# Masuuliyadaha Warbixinta



## *ee Daryeel-bixiyayaasha Qaraabada Shaatiga Haysata iyo Waalidiinta Daryeelaya*

*__WAC 110-148:__ Jaantusyadan soo socda waxa loogu talogalay inuu noqdo hagaha waalidiinta si ay u daryeelaan. Qoraalkan hoose waa lasoo koobay; __Qoraalka dhammeyskatiran waxa laga heli karaa WAC 110-148-1420 ilaa 110-148-1430__.*

### Kagasoo warbixi 48 saac Qaadashada DCYF gudeheed (1-866-363-4276) iyo Shaqaalaha Ilmaha ama Maamulaha Kiiska CPA iyo Maamulaha Kiiska Qabiilk

- Dhimashada ilmaha ku jira daryeelka.
- Looga shakiyey, ama sheegida, xadgudub jidheed ama galmo, dayacaad, ama ka faa'idaysiga ilmaha.
- Xidhiidh galmo oo u dhaxeeya caruurta oo aan loo tixgalin caadiyan ciyaar dhex marta caruurta da'da dugsiga barbaarinta.
- Iskudayga ismiidaaminta ilmaha **oo u baahan** daaweyn caafimaad ama cisbitaal.
- Caqabadaha jidheed ee lagu eedeeyey inay yihiin ku aan habooneyn ama dheeriya.
- Xadgudubka jidheed ee u dhaxeeya caruurta **oo ay ka dhalatay** daaweyn caafimaad ama cisbitaal dhigid.
- Xadgudubka jidheed ee waalidka daryeelaya, shaqaale, ama dadka kale, ee ilmaha daryeelka ku jira **o ay ka dhalatay** daaweyn caafimaad ama cisbitaal dhigid.
- Daawo kasta oo loo bixiyey ama loo isticmaalay si qaldan, oo ay ka dhalatay daaweyn caafimaad.
- Xanuunka, dhaawaca, ama daryeelka maskaxeed ee halista ah, **oo u baahan** daaweyn caafimaad ama cisbitaal dhigid degdeg ah.
- Waxyeelada hantida ee ku jirta khatar badqab ee aan loo sixin si degdega ama saameyn karta caafimaadka iyo badqabka caruurta.

### Kagasoo warbixi 48 saac gudehood dhacdooyinka Shaqaalaha Ilmaha ama Maamulaha Kiiska CPA iyo Maamulaha Kiiska Qabiilka

- Daaweynta xirfadle caafimaad oo xaalad caafimaad oo degdega ama daryeelka maskaxda oo degdega; ama
  Dhibaatooyinka lama filaanka ah ee caafimaadka oo ka baxsan heerka caadiga ee falcelinta ay keento daaweyntu taasoo **aan u baahneyn** daaweyn xirfadle caafimaad.
- Fikradaha ismiidaaminta, xarakaadka, ama iskudayga ama isdilida guriga ee **aan u baahneyn** daaweyn caafimaad ama cisbitaal dhigid.
- Hab-dhaqankasta oo galmo oo aan habooneyn, ama ku aadan, ilmaha la daryeelayo.
- Isticmaalka xadidaada jidheed ee la mabnuucay ee maamulida hab-dhaqanka.
- Xadugudbka jidheed ee u dhaxeeya caruurta oo keenaya dhaawac, laakiin **aan u baahneyn** daaweyn xirfadle caafimaad.
- Xadgudubka jidheed ee waalidka daryeelaya, shaqaalaha, mutawadace, ama dadka kale ee ilmaha ku jira daryeelka, **ee aan u baahneyn** daaweyn xirfadle caafimaad.
- Daawooyinka si qaldan loo siiyey ama loo isticmaalay ee, **aan u baahneyn** odaaweyn caafimaad.
- Isticmaalka daroogo ama alkahool ee ilmaha la daryeelayo.

### Ilmaha ka Maqan Warbixinaha Daryeelka

- ❑ Ogeysii shaqaalaha ilmaha, ama Qaadashada DCYF, isla markaaba haddii kadib saacado ama shaqaalaha aan la helin karin. Ogeysii maamulaha kiiska ilmaha haddii ilmaha loo xilsaaray CPA.
- ❑ Kula xidhiidh sharci-fulinta lix saac gudohood. Weydii lambarka warbixinta Qofka Maqan oo sii shaqaalaha ilmaha. Waa inaad dhakhso ula xidhiidhaa sharci-fulinta haddii:
  - Ilmaha la aaminsan yahay in la qaatay, sabasho lagu kaxaystay, ama la meeleeyey oo aad aamisan tahay in ilmuhu halis ugu jiro xadgudub jidheed ama galmo ama ka faa'idaysi.
  - Ilmuhu ka yar yahay da'da 13.
  - Ilmuhu leeyahay xaalado jidheed, maskaxeed, ama shucuured oo, haddii aan la daaweyn, halis ku keenays ilmaha.
  - Ilmuhu wax dhalay ama xaamilo tahay.
  - Ilmuhu leeyahay naafo maskaxeed ama korniin oo carqaladaynaysa awooda ilmuhu ku daryeelayo naftiisa.
  - Ilmuhu leeyahay dhibaato la qabsi alkahool ama daroogo oo halisa.
  - Ilmuhu halis ugu jiro duruufo kale.
- ❑ Kadib markaad la xidhiidho sharci-fulinta, kala xidhiidh Xarunta Qaranka ee Caruurta Maqan ama Laga Faa'idaystay 1-800-843-5678.
- ❑ Haddii aad ogaatid halka ilmuhu joogo ama ilmuhu kusoo noqdo guriga, u sheeg shaqaalaha ilmaha.

### Ku Wargali Cida Shatiga haysta si degdega (72 saac gudohood) (DCYF ama Wakaalada Meelaynta Ilmaha, sidii macquula)

- ❑ Isbadelka ciwaanka ama lambarka taleefanka.
- ❑ Waxyeelada ama isbadelada qaab-dhismeedka.
- ❑ Isbadelada codsiga rasmiga ah.
- ❑ Waalidka daryeelaya oo u guuraya goob cusub. Guuritaanka waa in lagu dhammeystiraa 30 maalmood gudohood waalidka daryeelka ee degaya gurigooda cusub si ay usii haystaan shaatigooda saxda ah.
- ❑ Isbadelkasta oo muhiima oo ku yimaad guriga ama dadka ku nool, oo ay ku jiraan isbadelada xaalada guurka, kala daga lamanaha, xidhitaanka qof qoyska ah ama helitaanka caruurta, dhimashada xubin qoyska ah, dadka ka tagaya ama imanaya, xanuunka jidheed, xanuunka maskaxeed ama isbadelada daaweynta ee saameyn kara daryeelka, isbadelka shaqaaleysiinta ama hoos dhaca weyn ee dakhliga, ama korashada ilmaha.


Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

QAADASHADA: **1-866-363-4276**



*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen, ama maskaxeed. Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhiyaha Qaybaha Telefoonka) 1-800-723-4831 ama iimaylka __communications@dcyf.wa.gov__.*



DCYF PUBLICATION LIC_0003 | DSHS 22-1746 SM (03-2025) Somali